



**XEERKA GUDDIGA**

**1.80.020-P**

**Xeerka Takoor  
La'aanta/Ka Hortaga  
Dhibaateynta**

Dugsiyada Dadweynaha Portland way aqoonsan yihiin kala duwanaanshaha iyo qiimaha ay leeyihiin dhammaan shakhsiyaadka iyo kooxahu iyo dooraka ay ku leeyihiin bulshada.

Degmada waxay mamnuucdaa takoorka iyo dhibaateynta ku saleysan si kastoo sharciga ku illaalsan, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xadidneyn, shaqsi loo arko ama jinsiyadiisa dhabta ah, midabka, diinta, jinsiga, dooqa galmada, muujinta jinsiga ama aqoonsiga, asalka dhalashada ama qowmiyada, heerka guurka, da'da, naafonimada damiirka ama jireed, uurka, heerka qoyska, heerka dhaqaalaha, heerka halyeyga, ama sababtoo ah jinsiyada loo arko ama dhabta ah, midabka, diinta, jinsiga, dooqa galmada, asalka dhalashada ama qowmiyad, heerka guurka, da'da, naafonimada damiirka ama jireed, uurka, heerka qoyska, heerka dhaqaalaha, ama heerka halyeyga ee qof walboo kale ee uu shaqsiga la xiriiro. Jinsiyada waxaa ka mid ah sifooyinka jireed oo taariiq ahaan la xiriiro jinsiyada, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xadidneyn, timaha dabiiciga ah, qaabka timaha, nooca timaha iyo qaab timeedka illaalsan (qaab timeedka, midabka timaha ama qaabka u xirashada timaha oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xadidneyn, timo dabida, iyadoo aan laga eegin in timo dabida lagu sameeyo kordhino ama qaab qurxin leh, isku xirma ama isku laabma).

Degmada waxay mamnuucdaa takoorka iyo dhibaateynta ee dhammaan barnaamijyadeeda iyo howlaheeda, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xadidneyn, shaqada, howsha, iyo dalacsiinta shaqaalaha; fursadaha waxbarashada iyo adeegyada la siiyo ardayda; shaqada ardayga ee dugsiyada iyo fasalada; anshaxa ardayga; goobta iyo isticmaalka xarumaha; bixinada waxbarashada iyo alaabaha; iyo ku qaabilida dadweynaha ee shirarka dadweynaha.

Cabashooyinka la xiriiro takoorida iyo dhibaateynta waxaa loo gudbin karaa maamule walboo Degmada ah ama maareeyaha, oo ay ku jiraan Waaxyada Shaqaalaha (qadka cabashada: 503-916-2990 ama [hrlegal@pps.net](mailto:hrlegal@pps.net)), PPS's Title IX Office ([Titleix@pps.net](mailto:Titleix@pps.net)), iyo Kormeeraha guud. Intaas waxaa dheer, cabashooyinka la xiriiro takoorida waxaa lagu soo xareyn karaa Mareykanka ama Xafiiska Waaxyada Waxbarashada ee Xaquuqaha Rayidka. Dhammaan cabashooyinka la xiriiro dhibaateynta galmada iyo xadgudubka galmada waxaa sidoo kale loo gudbinayaa Title IX Office.

Cabashooyinka waxaa lagu sameyn karaa si qarsoodi ah; si kastaba, cadeynta cadeymaha waxaa looga baahanyahay tallaabo walboo edbin ah ama cawaaqiibaha kale.

Warbixin gaar ah oo ku saabsan meesha lagu xareeyo cabashada waxaa laga heli karaa

halkaan: [hyperlink landing page]

Aargoosi, cabsi gelinta, dhibaateynta, ama hanjabaadaha ka dhanka ah qof walboo si daacad ah u soo waramo, loo maleeyo inuu soo sheegay, ama haddii kale ka qeybqaatay baaritaanka takoorka ama dhibaateynta ayaa si adag loo mamnuucay, iyadoon laga eegin haddii cabashada la cadeeyay. Bilowga iimaanka wanaagsan ee cabasho walboo takoorka ama dhibaateynta ee arday si xun uma saameyneyso meeleynta dugsiya ardayga ama jawiga barashada waxbarashada. Bilawga iimaanka wanaagsan ee cabasho walboo takoorka ama dhibaateynta ee shaqaalaha si xun uma saameyneyso xeerar ama shuruudo walba ama jawiga shaqada ee cabashada shaqaalaha. Wargelinada beenta ah ee lagu ogaado in lagu sheegay iimaan xun ayaa loo tixgelinayaa dambi culus oo waxay keeni kartaa tallaabo edbin ama ciqaabo kaloo ku haboon.

Degmada waxay baareysaa cabashooyinka takoorida oo dhan, dhibaateynta, iyo aargoosiga.

Tixraacyada Sharciga: